

Imisa ayay waalidku bixiyaan?

Hadii canug ama ilmo uu kuu dhigto barnaamijka taageerada luuqada oo qayb ka ah barnaamijka "German for School" ku darsashada waalidku waa Fr. 300 halkii canug iyo simistarka.

Maxay tahay macnaha barbaarinta?

Waalidiinta ay caruurtoodu ka qayb qaataan barnaamijka "German For School" waxay qaadanayaan sideed munaasabadood oo ah waxbarashada waalidka inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka 2023/2024. Ujeedada dhacdooyinkan ama munaasibadahan waa in loo diyaariyo waalidka iyo caruurtooda xanaanada. Xirfadaha barbaarinta waa la xoojiyay ilmahana waa la dhiiri galiyay iyadoo lagu dhiiri galinayo ciyaar iyo waxbarasho ku salaysan cilmi baaris oo guriga ah. Macalimiinta xanaanadu waxay la xidhiidhaan waalidka waxaanay dhihi karaan kalsooni xataa ka hor inta aanay caruurtu galin xanaanada. Waxbarashada waalidka waxa loo qaabeeyay si waalidka shaqeeya ee aan aqoonta u lahayn luuqada Jarmalka ay sidoo kale ka qayb qaadan karaan. Waxbarashada waalidku waa lacag la'aan daryeelka caruurtana waa la bixinayaa.

Maamullaha Barnaamijka „Deutsch für die Schule“:

Sabrina Leib

Schulweg 8
7430 Thusis
079 428 79 32

deutschschule@schule-thusis.ch



German for school

Ku baro luuqada Jarmalka laba sano ka hor xanaanada caruurta.

Macluumaad loogu talagalay Waalidiinta

Febraayo 2022

Marka aad ku galayso xanaanada da'da shan sano jir, ilmuhu waa inuu awooda in uu ku hadli karo afka Jarmalka. Hadii aanu ilmuhu lahayn aqoon ku filan oo afka Jarmalka ah, Dawlada hoose ee Thusis ayaa bixisa barnaamij loogu talagalay taageerada luuqada. Laba sano ka hor xanaanada caruurta, caruurta waxa la xanaaneeyaa usbiicii hal maalin mudo 15 usbuuc ah simistarkiiba Dugsiga St. Catharina ee Cazis. Waalidiintu waxay ka qayb qaataan barnaamijka waxbarashada waxaanay si firfircooni leh u taageeraan ilmahooda mudada lagu guda jiro sanadaha taageerada.

Maxaad loo baranayaa Afka Jarmalka ka hor xanaanada?

Barashada Afka Jarmalku waxay muhiim u tahay guul laga gaadho dugsiga. Caruurta ku hadla waxyar ama aan ku hadalba afka Jarmalka marka ay galaan xanaanada mustaqbalkoodu waxbarasho ee dugsiga waxay kala kulmaan xaalad aan fiicnayn marka la barbar dhigo ardayda kale ee afka Jarmalka ku hadla.

Dugsiga Thusis waxa uu hore usoo arkay in badan oo caruurta ka mid ahi aanay lahayn aqoontii ku filnayd ee afka Jarmalka marka ay galaan xanaanada. Dawlada Hoose ee Thusis sidaa awgeed waxa ay samaysay fursad lagu siinayo taageero gaar ah caruurtan. Dawlada Hoose ee Thusis waxay ogolaatay barnaamijka “German For School” kulan dhacay 19kii Noofambar 2018, waxaanay kulankaa ku sameesay mudo kordhin laba sanadood ah 16 Diisambar 2019.

Sidee ayay caruurta yaryari u baranayaan afka Jarmalka?

Caruurta yaryar waxay ku bartaan luuqadaha in ay xidhiidh la sameeyaan daryeel bixiyayaasha iyo macalimiinta xaaladaha maalin walba. Takhasuslayaasha ka socda dugsiga St. Catharina waa dad si khaas ah loo tababaray waxaanay kor ugu qaadaan horumarinta luuqada qaab ciyaareed hadaf leh. Kor u qaadista afka Jarmalka ka sokow, waxa jira sababo kale oo badan oo loogu talay galay barnaamijka noocan ah. Goobahan, caruurtu way wada ciyaaraan, isu dhex galaan si kooxkoox ah, horumariyaan naftooda oo ku tiirsanoontoodu yaraato. Xooga waxa la saaraa taageero dhamaystiran caruurta loogu talagalay.

Sidee ayaad u go'aansan kartaa in ilmuhu ugu hadlo afka Jarmalka si fiican oo ku filan?

Khabiirada ka socda Jaamacada Basel waxay ay diyaariyeen habraac cilmiyeed su'aalo ah. Tani waxay u ogolaanaysaa waalidka in ay si sax ah u qiimeeyaan aqoonta ilmahooda ee afka Jarmalka, xataa hadii aanay waalidku ku hadal afka Jarmalka. Su'aalaha waa la heli karaa iyagoo luuqado badan ku qoran. Waxa la siin doonaa dhamaan waalidka caruurtoodu laba sano iyo badh ay uga hadhsan tahay galitaanka xanaanada munaasabada macluumaadka oo dhacaysa bisha Janaayo waana lala buuxin doonaa. Waalidiinta aan iman xaflada boostada ayaa loogu soo diri doonaa su'aalaha.

Jawaabaha waa la qiimayn doonaa iyadoo lala kaashanayo Jaamacada Basel. Bisha Maarso, maamulka barnaamijka ayaa qoraal ahaan ugu wargalin doona waalidiinta oo ku saabsan natiijooyinka iyo habraacyada dheeraadka ah. Hadii qiimayntu ay muujiso in aqoonta afka Jarmalka ee ilmuhu aanay ku filnayn in uu ku galo xanaanada, talo soo jeedin ayaa la samayn doonaa oo ah kasoo qaybgalka barnaamijka “German for School”.

Talo so jeedintu – hada waa maxay?

Hadii ilmuhu helo talo bixin ah inuu barto afka Jarmalka, waalidku waa inay isu diiwangaliyaan ka qaybgalka barnaamijka. Maamulka barnaamijka “German for School” ayaa tan waalidka ka taageeri doona. Hadii qiimaynta su'aalaha iyo qiimaynta khabiiradu ay is waafaqi waayaan, caruurta waa laga reebi karaa barnaamijka.

Imisa jeer ayaa ilmahaygu ay tahay inuu xaadiro?

Barnaamijku waxa uu ku waajibinayaa caruurta in ay bartaan afka Jarmalka usbuuciiba hal maalin mudo 15 usbuuc ah simistarkiiba laba sano ka hor inta aanay galin xanaanada. Xaadiritaanka caadiga ahi waa waajib. Fasaxyada dugsiga ee dawlada hoose ee Thusis ayaa la dabaqayaa. Waalidiintu waxay isku raaceen in maamulka barnaamijku uu soo ogaysiiyo hadii ilmuhu aanu si joogto ah uga qaybqaadan.